**Patientinformation**

(Till dig som ska göra abort i graviditetsvecka 13 - 22 /medicinska metoden)

# Warbixintaan waxeey ku saabsantahay qofka ilmo iska soo ridaya oo urkiisu u dhaxeeyo usbuuca 13-22

## Waa sidee ilmo soo riditaanka usbuuca 12naad kadib?

Daaweeynta waxeey u dhacdaa labo talaabo.Waxaa lagu siinayaa marka hore daawo kaniini ah taasoo saameeyn ku sameeyneeyso uurka una diyaarineeyso ilmo galeenka ilmo soo rididda.Daawadan waxaa lagu siinayaa inta lagu gudo jiro booqashadaada isbitaalka. Maalin ama labo casho kadadib ayaad soo laabaneeysaa qeebta qaabilsan uurka yar ee maalmeed ama qeebta 35 oo dhaqtarka Näl. Halkaa waxaad ka heleeysaa daawo kale oo keeneeysa xanuun sidii foosha ah, taasoo sababeeyso in uurka soo dhaco,sidii dilanka oo kale.isbitaalka ayaad joogeysaa maanlikaa

## Waxaad bilaabeeysaa inaad qaadato daawada ilmaha soo rideeyso

Uma baahna wax diyaargaroow ah qaadasha daawadaan. Haweenka uurka leh intooda badan lalabo ayeey dareemaan weeyna u fududdahay ineey matagaan.Markaad kaniiniga laqdo waa muhiim inaadan matagin ugu yaraan saacad. Hadii add matagto saacad gudaheed waa inaad laqdo kaniiniga mar labaad.

## Maalinta u dhaxeeyso daaweenta

Dadka intooda badan wax ma dareemaan daawada markeey qaataan, laakin dadka qaarkood ayaa dhiig ka yimaadaa waxaana  eey dareemaan xanuun sidii caadada oo kale ah.Xanuunka waxaad u qaadan kartaa Ipren (Ibumetin) ama Alvedon. Marar dhif ah waxaa dhici karto inaad xanuun badan dareento oona dhiig badan kaa yimaado.Markaa waa qasab inaad la soo xiriirto dhaqtarka  si add u hesho talo bixin. Waxaa dhici karto inaad timaado qeebta amerjensiga(akuten) telefonka add soo waceeyso wuxuu ku yaalaa warqada dhinaceeda danbe.

Maaha go´aan fudud ilmo soo ridida. Waxaa kugu soo dhacayo su,aalo badan oodan horey isku weeydiin. Hadaa dooneeyso fakarkaada inaad qof la wadaagto maalinkaa, haka labalabeeyn inaad soo wacdo dhaqtarka taleefon nambarka wuxuu ku yaalaa warqadaan dhinaceeda danbe.

## Ilmo iska soo riddid

Maalinkaan waad soo quraacan kartaa intaadan imaan dhaqtarka,markaa kadib ma cuni kartid cunto ama cabitaan ann ka aheeyn biyo cad ama safti.Markaad timaado qeebta qaabilsan uurka yar ee qaabishi bukaanka maalinkii(mottagning) ama qeeybta 35 waxaa lagu siinayaa daawo oo kaniini ah oo hoosta/cawrada la galinayo.Daawadaan waxeey sameeyneeysaa in makaanka/minka isku soo uruuro. Waxaana lagu siinayaa islamarkaa daawo xanuun baabi,eye ah. Waad sii wadeeysaa qaadashada daawada saddaxdi saacba mar,laakin hada waxaa lagu siinayaa kaniini la laqayo. Tani waxeey dhaceeysaa ilaa ilmaha uurka ku jiro iyo mandheerta soo baxdo. Intee ayeey qaadataa ilaa waxa dhan soo baxaan weey kala duwantahay haween kaste waa nooc maraka qaarkood waxeey ku xirantahay uurka intuu yahay.

Caadi ahaan waxeey qaadataa 10- 12 saacadood laakin waxaa dhici karto ineey qaadato waqti intaa ka yar ama ka badan.Xanuun baabi,iyaha waxaa lagu siinayaa marka ugu horeeysa ka hortag ahaan kadibna weey kala duwantahya qof walbo baahidiisa waa gooni. Waxaa dhici karto mandheerta ineey kaligeed soo bixin, markaa waxaad u baahantahay soo xaaqitaan waana lagu suuxinayaa muddo gaaban qeebta qalninka.

Maalintaan markaad noo imaneeyso waxaa soo kaxeeysataa qof qaraabo ah. Soo qaado aqoonsigaada(legitimation) dhar nafis ah boorsada yar ee qalabka musqusha lagu rito, kastuumo ama nigis iyo wax add is ku maddadaaliso.

## Maxaa ku dhacaayo uur jiifta?

Waxaa jirto fursad ah inaad goaanka adiga leedahay hadaad dooneeyso si gaar ah in loo daryeelayo ilmaha dhiciska ah.Hadii aadan dooneeyn daryeel gaar ah dhiciska ama uur jiifta waa la gubayaa kadibna danbaska waxaa lagu rusheenayaa geedka xasuusta.

## Ilmo soo rididda ka dib

Guriga ayaad adi kartaa saacado kadib markii ilmaha soo riditaanka kuu dhamaado. Waxeey ka dhigantahay inaad guriga aadi karto isla maalinkaas, mararka qaarkood waxaa dhici karto inaad habeenkii seexato oo maalinta labaad add baxdo.Markaad guriga aadeeyso waxaad u baahnaan kartaa in laguu qoro daawo joojiso naasaha ineeysan ku xanuunin oo aysan caano gali.

Hadii add laheed lalabo weey kaa dhamaaneeysaa ayaamo kadib.

Dhiiga maalinka ugu horeeyo wuxuu ahaanayaa sidii dhiiga caadadda oo yara badan kadibna wuu dhamaanayaa si tartiib ah. Waa caadi inuu dhiig kaa socdo inta u dhaxeeyso 2-4 asbuuc kadib. Hadii dhiiga kaa socdo ka badanyahay dhiigaada caadada ee caadiga ah oo la jiraan xinjiro waaweeyn waa inaad nala soo xiriirto si talo bixin add u hesho.

Intuu dhiiga kaa socdo, waxaad iska ilaalineeysaa si aadan infekshin u qaadin inaad wax galiso cawrada ama xubinta taranka, tusaale ahaan ha isticmaalin tambooniga kor loo gashado, iska ilaali galmada iyo dabaasha. Qandho ,xanuun cusub ama

dhiig kugu soo kordha wuxuu astaan u yahay infekshin. Xanuunka waxaad u qaadan kartaa xanuun baabi,iye (Ipren) ,(Ibumetin) ama Alvedon.

**Caadi ahaan ma dhacdo in dhibaatooyin caafimaad kaa soo gaaraan xaaqitaanka , laakin waxaa muhiim ah inaad ogaato waxa dhici karo:**

- Waxaa kugu dhici karo infekshin. Markaa waxaad u baahantahay inaad qaadato antibiyootik,
- Naasaha weey ku adkaan karaa.

Hadii xaaladahaan aan kor ku sheegnay kula soo gudboonaadaan -la soo xiriir qadhtarka si add u hesho talo bixin!

**So noqoshada**
Waxaan kugu la talineeynaa inaad soo laabato booqasho kale afar asbuuc kadib, soo noqoshada waxeey noqon kartaa umulisada xaafada, la taliye (kurator) ama daryeelka haweenka.Booqashada soo laabadka waxaa la hubiyaa inaad ka soo kabatay maskax ahaan iyo jir ahaan ilmo soo ridida.

| **(Besök)** | **(dat)** | **(tid)** |
|---|---|---|
| Booqashada 1 | Taariqda _______ | saacada_______ |
| Booqashada 2 | Taariqda _______ | saacada_______ |

**(Kontakt barnmorska)** La xiriir umulisada

____________________

**Gynekologmottagningen**
**Telefon 010-435 22 00**
Måndag – torsdag kl. 08.00 – 16.00
Fredag kl. 08.00 – 15.00

**NÄL, Avdelning 35**
**Telefon 010-435 03 50**
Övriga tider